

Bayaanka Xuquuqda Daryeelka Guriga ee Minnesota

SIDA UU QABO XEERKA MINNESOTA, QAYBTA 144A.44

XUQUUQYADAAN WAXAY QUSEEYAAN QAATAYAASHA KA HELA ADEGYADA DARYEELKA GURIGA BIXIYEYAASHA DARYEELKA GURIGA KELIYA EE SHAHAADA U HAYSTA.

Bayaanka Xuquuqda

Qof adeegyada daryeelka guriga lagu siinayo xuquuqdanaan ayuu leeyahay:

1. Xaq u leehay in la siiyo macluumaad qoraal ah ee xuquuqda ku taxluqa laga hormariyo adeegyada la siinayo, ay ka midyihiin waxa laga yeeli doono haddii xuquuqda la jabiyo.
2. Xaq u leeyahay in la siiyo daryeelka iyo adeegyada ayadoo la tixraacayo qorshe ku habboon oo casri ah, iyo waafaqaya xeerarka daryeelka caafimaadka, heerarka daawaynta iyo daryeelka, iyo qayb libaax ka qaadatid dhisidda, habaynta, iyo qiimeynta qorshaha iyo adeegyada.
3. Xaq u leeyahay in loo sii sheego kahor inta aan adeegyada la siin, nooca iyo aqlaaqda shaqaalaha adeegyada siin doona, tirada booqashooyinka la soo jeediyay in la siiyo, doorashooyinka ee loo diyaarshay in ay wax ka qabtaan baahiyada daryeelka guriga, iyo saamaynta ay yeelan karaan marka adeegyadaan la diido.

4. Xaq u leeyahay in si horraansho ah loogu sheego in talooyin kastoo isbaddallada ee uu daryeelaha soo jeediyay ee qorshaha adeegyada ku jira iyo in uu qayb libaax ka qaato go'aan kasta ee isbaddallada qorshaha adeegyada ku taxluqa.

5. Xaq u leeyahay in uu adeegyada ama daawaynta diido.

6. Xaq u leeyahay in uu ogaado, kahor inta aan adeegyada lagu siin ama inta wareysiga booqashada u horreysa lagu jiro, caddadka ay noqonayaan adeegyada ka jira guriga daryeelaha.

7. Xaq u leeyahay in loo sheego kahor inta aan aadeegyada loo bilaabin kharashyada uu daryeelaha adeegyada ku soo dallacayo; illaa inta ay tahay lacagta ay bixin doonaan caymiska caafimaadka, barnaamijyada guud, ilaha kale, haddii la yaqaanno; iyo kharashka rukunka laga rabo in uu jeebkiisa ka bixinayo.

8. Xaq u leeyahay in uu ku ogaado in ay dhici karto in ay jaalliyadda ka jiraan adeegyo kale, ay ka midyihiin adeegyada daryeelka guriga iyo dayeelayaal kale, iyo uu ogaado meesha macluumaadka adeegyadaan ku taxluqa laga raadinayo.

9. Xaq u leeyahay in uu si xor u kala xusho daryheelayaasha jira iyo daryeelayaasha baddasho kaddib marka ay adeegyada bilawdaan, ka bixin xuduuddada caymiska caafimaadka, caymiska daryeelka muddada dheer, gargaarka caafimaadka, iyo barnaamijyada kale ee caafimaadka.

10. Xaq u leeyahay macluumaadka shakhsiyeed, maaliyadda, caafimaadka gaarka u ah la asturo, iyo in loo sii sheego sida ay

yihiin daryeelaha shuruudihiisa iyo habraacyada la xariira siidaynta macluumaadkaa.

11. Xaq u leeyahay in uu daabacdo macluumaadka rukunka u gaarka si waafaqsan qaybaha 144.291 illaa 144.298.

12. Xaq u leeyahay in uu adeegyada ka helo dad tababar fiican iyo tayo leh in ay hawshooda gutaan.

13. Xaq u leeyahay in la xushmeeyo iyo la xaqdhawro, in rukunka waxiisa la xaqdhawro.

14. Xaq u leeyahay in uu xor ka ahaado xadgudubka jirka iyo qaylada, dayaca, iyo guud ahaan nooc walba ee darxumayn ee ku xusan Sharciga Dadka Waaweyn ee Baylahan iyo Sharciga Darxumeynta Caruurta.

15. Xaq u leeyahay in si cagligala, hordhac ahaan lagu ogaysiiyo isbadallada ku soo fool leh adeegyada iyo kharashyada.

16. Xaq u leeyahay in uu ogaado daryeelaha sababtiisa uu adeegyada kaa joojinayo.

17. Xaq u leeyahay in la siiyo toban cisho oo ogaysiisa in adeegayda uu daryeelaha joojinayo marka laga reebo xaalado sida:

(i) Rukunka uu la yimaado dhaqamo si weyn u baddalaya qawaaniinta qorshaha adeegyada lala galay daryeelaha guriga xanaanada;

(ii) Rukunka, qofka rukunka la deggan, ama qof kale uu la soo baxo dhaqan xadgudub ah ama halis ku ah jawiga qofka adeegyda daryeelka bixinaya; ama

(iii) Xaalad degdeg ah ama isbaddal weyn ee rukunka xaaladdiisa ay sababayso in la bixiyo adeegyo uusan qorshaha hadda jira ka bixin karin iyo in uusan daryeelaha guriga daryeelka ku qancin karin.

18. Xaq u leeyahay in uu helo wareejin isuduwan marka ay dhacdo in uu isbaddal ka dhaco adeegyada uu daryeelaha bixin doono.

19. Xaq u leeyahay in uu ka cawdo waxa adeegyada lagu siinayo ku taxluqa, ama lagugu siin waayay, iyo xushmadla'aanta iyo xaqdhawridla'aanta ee rukunka nafsaddiisa ama hantidiisa soo foodsaartay.

20. Xaq u leeyahay in uu ogaado sida loola xariirayo shakhsi la shaqeeya daryeelaha ee masuul ka ah xallinta mushkiladaha iyo in uu daryeelaha baaro iyo iskudayo xallinta cabashada ama ashtakada.

21. Xaq u leeyahay in uu ogaado magaca iyo cinwaanka ee hay'adda gobolka ama degmada si aad ugula xariirtid macluumaad ama gargaar dheeraad ah.

22. Xaq u leeyahay in uu shakhsi ahaan xuquuqyadaan ku adkaysado, ama uu ku adkaysto rukunka wakiilkiisa ama qof un rukunka metelaya, ay aargosashada ka reebantahay.

**HADDII AAD CABASHO KA QABTID WAX KU
TAXLUQA DARYEELAHA AMA QOFKA BIXINAYA
ADEEGYADAADA GURIGA DARYEELKA, WAXA AAD
WACI KARTAA, U QORI KARTAA, AMA TEGI
KARTAA XAFIISKA CAABASHOYINKA RUGTA,
WAAXDA CAAFIMAADKA EE MINNESOTA. WAXAA
KALE EE AAD LA XARIIRI KARTAA XAFIISKA
SARKAALKA BAARA ASHTAKADA DARYEELKA
MUDDADA DHEER AMA XAFIISKA SARKAALKA
BAARA ASHTAKADA CAAFIMAADKA DHIMIRKA
IYO NAAFONIMADA KORITAANKA.**

Xafiiska Cabashooyinka Rugta Caafimaadka

Telefoonka: (651) 201-4201 ama 1-800-369-7994

Fakis: (651) 281-9796

Shabakadda Internetka:

<http://www.health.state.mn.us/divs/fpc/ohfcinfo/contohfc.htm>

Iimeylka: health.ohfc-complaints@state.mn.us

Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:

Minnesota Department of Health

Office of Health Facility Complaints

85 East Seventh Place, Suite 300

P.O. Box 64970

St. Paul, Minnesota 55164-0970



Sarkaalka Baara Cabashada Daryeelka Muddada Dheer

Telefoonka: (651) 431-2555 ama 1-800-657-3591

Fakis: (651) 431-7452

Shabakadda Internetka: <http://tinyurl.com/Ombudsman-LTC>

Iimeylka: mba.ooltc@state.mn.us

Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:

Home Care Ombudsman

Ombudsman for Long-Term Care

P.O. Box 64971

St. Paul, MN 55164-0971

Sarkaalka Baara Cabashada Caafimaadka Dhimirka iyo

Naafoonimada Koritaanka

Telefoonka: 651-757-1800 ama 1-800-657-3506

Fakis: 651-797-1950 ama 651-296-1021

Shabakadda Internetka: <http://mn.gov/omhdd/>

Iimeylka: ombudsman.mhdd@state.mn.us

Cinwaanka Warqadaha Loo Dirayo:

121 7th Place East

Suite 420 Metro Square Building

St. Paul, Minnesota 55101-2117

Magaca Shatiilaha: _____

Telefoonka: _____

Iimeylka: _____

Cinwaanka: _____

Magaca/Darajada Qofka ay dhici karto in loo dirayo

Dhibaatooyinka ama Cabashooyinka:



Ujeeddoyin maclumaad bixin keliya loogamana baanha qoraalka Bayaanka Xuquuqda Daryeelka Guriga: Xeerarka MN, qaybta 144A.44

Qaybhoosaadka 2. Fasiraadda iyo adkaynta xuquuqda.

Xuquuqdaan waxaa loo dhisay maslaxadda rukumada ee la siinayo adeegyada dareyeelka guriga. **Daryeelayaasha daryeelka guriga oo idil ay ku jiraan kuwa ka reeban ee hoosimaanaya qaybta 144.471, waa in ay addeecaan qaybtaan.** Maamulaha waxa uu adkayn doonaa qaybtaan iyo shuruuda daryeelayasha xuquuqda guriga daryeelaka ee ka reeban shatiyaynt ee iskusi ugu dhigma guri shatiga haysta. Daryeelaha guriga daryeelka kama uu codsan karo ama amri karo qofka in uu ka tanasulo mid kasta ee ka mid xuquuqdaan ee shuruud looga dhigayo helitaanka adeegyada. Qaraarkaan xuquuqda ma uu baddalayo ama hoos uma uu dhigayo xuquuqda iyo madax bannanida kale ee ka jira meesha ay rukumada adeegyada daryeelka guriga ka helayaan, dadka bixinaya adeegyada daryeelka guriga, ama daryeelayaasha shatiga leh ee hoosimaanaya qaybaha 144A.43 illaa 144A.482.